

# Iskudubaridka Daryeelka ee shaqsiyaadka qaba Naafooyinka Garaadka iyo koriimada

## Muxuu yahay?

Shaqsiyaadka qaba Naafooyinka Garaadka iyo koriimada ee u qalma inay helaan taageerooyinka iyo adeegyada uu baxsho Xafiiska Dadka Qaba Naafooyinka koriimada OPWDD. Isku dubaridka adeegyadaan waa mid kamid ah taageerooyinka.

Ururada Isku Dubarida Daryeelka (CCO's) ayaa iskudubarida labadaba adeegyada guriga iyo bulshada - saleysanee caafimaadka iyo faya-dhawrka.

## Yay Saameyneysaa?

Kahor Luuliyo 1, 2018, adeegyada waxaa bixiya Iskudubarideyaasha Adeegga Medicaid \*MSC's). Adeegyada Kadib 1da Luuliyo waxaa hadda bixiya Ururada Iskudubaridka Daryeelka (CCO). CCO ga isku dubarida adeegyada ayaan hadda kadib la shaqeyn doonin wakaaladaha bixiya adeegyada OPWDD.

Urur kasta wuxuu lahaan karaa jagooyin u gaar ah shaqsiyaadkaan sida Iskuduwaha Daryeelka ama Maamulaha Daryeelka ama Maareeyaha Daryeelka Caafimaadka Guriga. Jagooyinkooda ayaa kala duwanaan kara, laakiin doorarkooda ayaa iskumid ah. Qofkaan ayaa kaa caawinaaya:

- Iskudubaridka adeegyada dhammaan nidaamyada oo ay ku jiraan adeegyada la xiriira OPWDD, adeegyada caafimaadka habdhaqanka, iyo adeegyada caafimaadka.
- Hormarinta, kormeerka iyo cusbooneysiinta Qorshaha Noloshaha (oo horey loo oran jiray Qorshaha Adeegga Shaqsiga ah ama ISP).
- Isku xirka, gudbinta, iyo u doodista adeegyada iyo taageerooyinka.
- Kala-guurada noloshaha sida adeegyada dugsiga sare oo looga gudbo noloshaha dadka waawayn, isbitaal dhigista ilaa ka bixida, iyo kuwo kale.

## Maxay tahay inaad samayso talaabada xigta?

Haddii aadan horey ugu xirnayn Ururka Iskudubaridka Daryeelka, shaqsiga ama daryeeluhu waa inuu buuxshaa foomka diiwaan gelinta uuna doortaa Ururka Iskudubaridka Daryeelka.

Waxaa jira labo heer oo taageero. Kan koobaad waxaa leh dadka qaba baahiyaha heerarka sareeya, Qorshaha Maareynta Daryeelka Caafimaadka Guriga ayaa abuura lana socda qorshaha daryeelka. Qorshaha Adeegyada Aasaasiga ah ee Guriga iyo Bulshada (HCBS) ayaa bixinaaya maareynta balaaran ee daryeelka.

# Iskudubaridka Daryeelka ee shaqsiyaadka qaba Naafuoyinka Garaadka iyo koriimada

Maareeyaha Daryeelka Caafimaadka Guriga iyo Taageerada Qorshaha HCBS	Maareeyaha Daryeelka: Caafimaadka Guriga	Taageerada Qorshaha Aasaasiga ah ee HCBS
Waxay abuurtaa Qorshaha Daryeelka iyo Waxay Dib u eegis Samaysaa Labadii Sanaba mar	✓	✓
Waxay Kormeeraysaa Caafimaadka iyo Badqabka	✓	✓
Helitaanka Abaabulan ee Adeegyada Caafimaadka Dhimirka	✓	
Helitaanka Abaabulan ee Adeegyada Caafimaadka iyo Daryeelka Ilkaha	✓	
Waxay aqoonsataa Khayraadka Bulshada Ku Saleysan	✓	
Waxay U adeegsataa Tignooloojiyada Si ay Ula Xiriirto Adeegyadaada	✓	
Wuxuu Kugu Xirayaa Dhakhaatiirtaada	✓	
Waxay Qaadataa Culayska Isku xirka Nidaamyada ee Qoysaska iyo Shaqsiyaadka	✓	
Waxay Qiyaasaan Baahiyaha Mustaqbalka	✓	

Waajibaadka iskuduwaha ayaa yareynaaya caqabadaha shaqsiyaadka iyo qoysasku waajahaan inta ay adeegsanayaan nidaamyada iyo ururada. Helitaanka diwaannada elektarooniga ah ayay sidoo kale heli doonaan shaqsiyaadka iyo qoysasku.